



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Sibtambar 12, 2022

Ku socota: Ka qayb qaatayaasha ODDS, hawl wadaagayaasha iyo shaqaalaha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: U dabaaldega Toddobaadka Aqoonsiga Xirfadlayaasha
Taageerada Tooska ah

Dhammaanteen oo joogna ODDS waxaan u mahad celinaynaa
xirfadlayaasha taageerada tooska ah (DSP-yada) ee Oregon, shaqaalaha
taageerada shakhsi ahaaneed, xirfadlayaasha dhibaataada taageerada tooska
ah iyo farsamayaqaanada dhibaataada caafimaad ee adeegyada ka bixiya
guud ahaan gobolka. Waad ku mahadsan tihiin tabaruciina muhiimka ah!

Waxaad tihiin laf dhabarta nidaamkayaga. Ma aanan siin karneen
adeegyada muhiimka ah in ka badan 30,000 oo ah dadka reer Oregon ee
qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) dadaalkiina iyo
naxariistiina la'aantood.

Sibtambar 11–17 waa Toddobaadka Aqoonsiga Xirfadlayaasha
Taageerada Tooska ah ee Oregon. Guddoomiyaha Gobolka Brown ayaa
soo saartay [ku dhawaaqidan lagu maamuusayo shaqaalaha taageerada
tooska ah ee I/DD ee Oregon](#). Fadlan ogaada: Mahadnaqeen u waa mid
aad u dhaafsiisan xaddidaadaha toddobaadkani.

Dadaalkiinu wuxuu ahaa mid aan leexleexad lahayn idinka oo wax isku
dayayay iyada oo ay jireen duruufaha cudurka faafa, shaqaale yaraan,
cimilo aad u daran iyo caqabado kale. Tabaruciina, xirfadihiina iyo
khibradiinu waxay wanaajisaa nolosha dad badan oo reer Oregon ah.
Waan ogahay in aad shaqo wanaagsan u qabataan siyaabo dadka kale
aysan garanayn. Mahadsanid!

Waan ogahay oo idiinka mahadcelinayaa wax kasta oo aad qabataan. Niyadsamida aad u haysaan bixinta adeegyada qofka ku saleysan waa mid dhiirigelin leh.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.